# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:32 AM** **Hansard No.19/2** **08/09/2012**

**Dooda Xeerka Wadamarista Gaadiidka, waxay socotay 1 maalin waxaa ka qayb qaatey 7 mudane.**

**Gudoomiyaha: -** Md. Dr. Cali Yuusuf ayaa fadhigan Gudoominaya ka Furitaankii Quraanka wuxuu mudanayaasha ku wargaliyay inay Maanta Bilaabmeyso Doodii Xeerka Wadamarista Gaadiidka, sidaa darteed Mudanayaashu isu diiwaangaliyayaan dooda Xeerka Xoghayntuna soo Qorto.

***Doodii Mudanayaasha:-***

1. **Md .Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac: -** shir-gudoonka, Mudanayaasha, Sharafta leh ba waad salaaman tihiin, Xeerka Wada Marista waa alle mahadiis mar hadii uu Golaha uu horyaalo, hasayeeshee xeerkani waxaa uu u baahan yahay in laga baaraan dago oo aan lagu dagdagin ansixintiisa, sifiicana looga doodo waxyaabo badan oo ka maqana lagu soo daro.

Runtii xeerka akhris farabadan ayaa inoo yaala waxabaa lagu soo daray, hasayeeshee maadaama aan ka mid ahaa xildhibaanada u doodayay in uu xeerkanu Golaha horyimaado waxaan sheegayaa in xeekan baahi wayn loo qabo, umada reer Somaliland na waxaa gamka siiyay shil baabuur, shilalkaa baabuurna waxaa Soboba wado xumida, godadka Baabuurtu ka weecato inkastoo aan si idhaa hadii wadooyinka laga dhigo kuwo smooth ah Malaga yaabaa in gaawaadhidu u socoto si xawliya? Markaa waan in ***xeerkan waa in lagu soo daraa xawaaraha (National speed limit ) markii horaba waan ka cudur daartay waa hadaanu ku jirin waa in lagu daraa 70km/ber /mile ayaan ku talin lahaa hadii ay ku jirtana waa sax***.

Waxaa meesha taala side loo qabanayaa aduunyada hore-umartaya raadaalo ayay gaadheen in ay ku xidhaan oo gaadhiga raadaal sheego, *hasa yeeshee inagu ma haysano qalabkaa waxaa loo samayn karaa booliska wadooyinka ama boolinkaba waa in loo qaybiyaa wadooyinka dhaadheer ee isu xidha magaalooyinka Burco, Barbara iyo Hargeisa oo meelo qarsoodiya u istaagaan oo aanay dadku ogayn gaadhiga faska ahna ay ka daba ritaan baabuurtooda khaaska ah ayna qabtaan oo ay joojiyaan.*

Mida kale waxaa jira arrin aaanay fahmin qolooyinka wadooyinku oo ah buuga iyo liisanka keen caalamka meel jeebka lagu qaataa ma jirto ee waxaa la dhigtaa guriga bilayku mar ay ku jooyiyaam warqad ayay ku sinayaan layidhaa (produce) waxaanay ku qorayaa labarka gaadhiga (address) ka inagu address malihine labarkaaga tafaasiishaada ayay ku qorayaan todoba cisho gudohood ayaad ku keenaysaa (7 cisho) booliska kuuga dhaw ama xerada taraafikada hadaad

keeni weydana waa lagu ganaaxayaa max kamada ayaa laguu gudbinayaa hadaad gaadhi bilaa liisan ku kaxaysay ama aanad buugba lahayn sidaa weeyaam habku.

Markaa anuu waxaan qabaa hadii aynu nahay Golaha wakiiladda in xeerkan aan ansixino wixii muhiim ah na ka badaleyna, waana loo bahan yahay xeerkan, xeerkuna waan in uu ilaaliyaa ninka taraafikada ah iyo shicib ka ahba. Imika wan liftiga layidhaa qofka wadaha ahi waabu ka shikiyayaa qofka waayo waxaa uu ka baqayaa hadii uu turaanturoodo lacag ayaa laga doonayaa ama gaadhigii oo jaban oo (right off) ah ayaa uu qof fuulayaa oo uu ka dhacayaa qofkaasi waxaa uu odhanayaa gaadhi ayaan ka dhacay markaas ayaa la odhanayaa waa dushaada oo adiga lacag lagu weydinayaa xitaa hadii ilmaha yari gaadhiga dabada qabsado oo ka siibto adaa lagugu qabsanayaa magtaa markaa dadku wax yaabahaa ayay ka baqaan.

Xeerkanu waa mid loo bahan yahay waxanan ku adkaynayaa in la ansixiyo aadna ha loo akhriyo dooduna ha socoto waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in qodob qodol loo ansixiyo oo laga daayo duuduubka, Gudida Araimaha dibadana aad ayaan ugu mahad naqayaa arintaa ay aad ka uga soo shaqeeyeen.

In kastoo gudida ay ahayd in aad uga soo dhaqeeyaan arimaha  Somaliland iyo Somaliya waayo wadoo yinkii ayay soo galeen oo arimaha guduhu lahaayeen markaa waxaan u arkaa in ay hawl naga fursadeen, waxaa kale oo aan ku boorinay naa in ay aad uga hadlaan arinta xamar waayo mar walba waxy soo qaadaan Somaliland waxaana haboon in aad wax yaabahaa xeerka soo saartaan iyo  baaq iyo xakamayn hadaad xeerkan soo qabateena waan idinku mahad naqaynaa marlabaad hasayeeshee waxaan idin tusayay in xeerar badani Idiin yaalaan.

Dhanka calaamadaha waxaad arkaysaa Barbara iyo Hargeisa wadada u dhaxay saa waa (one way) wax calaamada oo muujinaysaa ma jiraan arinkaa waa in   ay qabtaan dawladaha hoose oo aya shaqadooda tahay in ay ku xidhaan taraafikaduna ay ilaaliyaan, kalmadan aan ku celcinayo ee ah buuga iyo liisan kan ka keena waxaan  u arkaa in ay baabuurta cidhiidhi galinayso oo mid walba waa la joojinayaa waxaana ila wanaagsan (produce) ka ee warqada la siinayo wixii ganaaxana waa la is la eegu doonaa ee dadku qaadi karayaaan waayo tacriifo badan ayaan lagu kordhiyay oo aynaan ogayn ayaa la kordhiyay meela badana waa la libin laabay eeri boodhadana lacagaa la iskaga qoray markaa ganaaxa aan qoraynaa waa in uu dadka u naxariistaa

**Gudoomiyaha:-** xildhibaanada waxaan ogaysiinayaa in la is dhagaysto oo la is ixtiraamo, badanaa xildhibaanadu intay is qoraan ayay baxaan hada kadib marka la baxayana waa la is xaadirinayaa

2. **Md, Cabdiqaadir Cali shabeel:-** Gudoomiyaha, Mudanayaasha waad salaaman tihiin, waxaan leeyahay mudanayaashu marka ay halkan ka hadlayaan in ay ilaaliyaan xaquuqda mudanayaasha kale iyo  waxkhtigaba, marka aan u soo daadago xeerka waxaan anigu qabaa ama aan aaminsanahay onoo soo koobaya waxaan aaminsanahay in uu xeerkanu aad xaasaasi u

yahay uuna yahay mid aad iyo aad u mihiim ah waxaana ka war haynaa dadka baabuurta wada magaaladeena ee sida dugaag nimada iyo bahalnimada ah u wada Baabuurta ee maalin walba sida xad dhaaf ka ah loogu dhimanayo ama loogu dhaawacmayo ee khadaare iyo faa'iido midna aan kala garanayn in intuu shalay baabuur soo iibsado ama lo soo dhiibo barina baaba'aya ee dadna ku dhimanayo waxaa aynu ka war haynaa inta ay baabuurta wada badhtankeeda dhigaan marka aad tidhaa ka qaadna ay kuugu jawaabayaan halkan Somaliland ayaa la yidhaaye is ka soco ama waabay ku caayay hadab bulshada qaybaheeda kala dun ee wada yaasha baabuurta magaa looyinka Somaliland waxaan u sheegaynaa in laga war hayo sida xakamayn la aan ta waliba xadgudubka ah ee bahal nimada ah ee ay ay wadaan baabuurta waa arin loo bahan yahay in loo sameeyo xeer lagu xakameeyo lagagana hortago arimahaas.

Waxaa nasiib wanaaga in maanta xeerkii halkan yaalo oo intiisii badnayd ay dhamaystiran tahay waan soo wada akhriyay wax yaryar ama intii fikir haysaa xildhibaana ay ku daraan way u banaantahay balse anuu qodobka aan ka waaya ee caalamka oo dhan laga dhaqmaa ee kaa la aan tii ayna waxba soconayn waxaa weeyi hay'ada la yidhaa (MOT motor tats) waa hay'ad babuurta fatashta ama baadha oo jeeg garaysa, halkan waxaad arkaysaa baabuurkii oo biriig la ayaa socda, kiiyoo il la ayaa socda , kiyoo saliid biriig la ayaa socda, kiyoo candhadu jaban tahay ayaa socda waxaanay qaybtaa si hoos timaadaa Wasaarada gaadiidka ( ministry of transport) waxaanay u wakiishaa laamo ama faracyo gobolada ama dagmooyinka dad caadiya oo geerashyo leh oo daba deedna la siiyo waraaqo ay ku kaantaroolaan waraaqahaas ayaana lagula xisaabtamaa waxaan kamida wadamada is ticmaala sida ingriiska

Hadii (MOT) aanu jirin oo baabuurkii aan la jeeggarayn ib uu biriigiisu hagaag san yahay oo kiliishkiisu shaqaynayo iyo in aanu mishiinkiisu aanu hagaag sanayn ama isagii kala dhan taalan dabadeedna suuqa lagu sii daayo oo uu aqal galo sida dhacda maalin walba khasaara uu gaysto ayaa qaba khasaarahaa waxaanan rabaa in gudoomiyaha iyo xildhibaanada aan arkaa maskax doodana aan ku shuba arinkaa (MOT) waa arin loo bahan yahay.

Waxaa kale oo aan xusayaa oo aan halkan ka sooo jeedinayaa ganaaxa inta badan qaybaha kala duwan ee ganaaxa loo cuskanayo waxaa u badan 25000sh/l ayaa u badan anuu waxaan odhan lahaa waayo ninka taraafikada ah ama salkaalka ah marka loogu yimaada goobta shaqada waxyaabo aan sharci ahayn oo isaga maskaxdiisa la kaashado ayaa jirata waxaa la yidhaa (commonsense) ganaaxa waxaa uu u salayna karaa maskaxdiisa ama 25, 50, ilaa 100 kun loo dhaxay siiyo ayaan rabaa ama aan soo jeedin lahaa sadexdaa qayboo oo hadba lagu saleeyo culayka ay leedahay arinkaasi lagu saleeyo, waayo ninka sarkaalka ahi isa ayaa go aamiya arimahaas lakiin waxaa loo bahan yahay in ninka taraafikada ahi uu aanu samayn xad gudub ee uu cadaalada raaco ayaa loo baahan yahay xeeka intiisa badan waan qaafaqay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-** in Marka xildhibaanada Qodobadey ka hadleen la soo ururiyo la iskuna soo guro sida ugu dhakhso badan xeerkan u gubino, waayo dhibaato badan oo aynu ka war qabno oo dadka shicidka ahina ya ka warqabaan oo baabuurta wadaana ay ku jiraan dad

qayro masuuliyiin ah iyo dad da'doodu ay aad u yartahay ay ku jiraan, dad aan sharci haysani ay ku jiraan oo ay waddooyinkana ku wadaan ayaa jira dhibaatooyin fara badan iyo tacatina waa laga la kulmaan.

3. **Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:** xeerkan ina horyaalaana waa mid aad loogubaahan yahay waana mid ay baahidiisu ay joogto duruufaha ina haystaana run ahaan tii sharciga ayay ka soo horjeedaan, waana laba wado mid waxaa mara Gadiidka markaa ta ugu horaysa eek u qabsanaysaa waxay tahay gaadiid keenu intaa baa ka ah (rood welth) wax wado mari kara waa in tee waxaan qabaa in cada aad u badan oo maarta mara dariiqyada aanu mudnayn in loo ogolaado in uu maro dariiqyada sobabta oo ah khatarteeda ayuu leeyahay.

   Talabaad waxaa la yidhaa sharci hadii aanad fulin karayn la ma sameeyo dee sharci la aana runtii lama joogi karo taasinina way ina haysataa waxaana is weydiin leh yaa kuu fulinaya askari miskiina oo dhaqaalihiisu aad u liito oo runtii tabcaan ah oo mar marka qaar kood aad is odhanayso malaha waxaa u dhaanta in uu dhulkiisaa shaxaado ayaa u dhaanta ayaanu sharcigeenii maanta marti u yahay waana qodob u baahan runtii la tixgaliyo waa hadii la doonayo wadooyinkeena in sharcigeena la waafajiyo oo askarigaa la waafajiyo.

   Waxaa kale oo imanaysa intee ayaa wadoo yinkeena ah (rood wealthy) laamayadii waa burburee caasimada gudeheedii ayaad arkaysaa dayacla'aanta ka muuqata waan run hadii baabuurta dariiqu marka xumaado dawlaha waaweyni dariiq kale ayay samaysataan kaasi marka uu gaboobo mid kale ayay samaytaan wadooyinkaa la samaynayo ee marba lahagaajinayaa waxay hoos imanayaan sharciga wadooyinka iyo cidii wadooyinka daryeesha iyo cida sharciga fulisa wahal umajar.

   ***Waxaan soo jeedinayaa:-*** ina hortaala (situation) aynu leenahay wixii anu sharciga ku soo Celino, hadana waxaas oo dhiba ayaa ina hortaagan ficlan anuu Gudidda hawshan inoo soo diyaarisay ee soo gaban qaabisay waxaan u arkaa rag geesiyaala waayo waxa ku dhiiradeen in ay qabtaan waxaas o dhibaato aad arkaysaan ayna isu soo duba ridee aad iyo aadna waan u amaanayaa wanan guubaabinayaa bal inaguna halkii sakaarada iyo moroodiga ayaan joognaaye balsidii aan waxan u socodsiin lahayn aan falawgeed aan gaadhno wasalaamu calaykum.

4. **Md. Baar Siciid Faarax :-**Waan ku faraxsanahay xeerkaa maanta las oo dhigay oo aan inbadan daba taagneyn oo aan ana ka midka ahaa dadkii daba taagnaa xeerkana waxaa uu ka mid yahay xeerarka u mihiimsan ee u baahan in wax laga qabto dhibaato joogto ah oo aan maalina kaliya la dhaafina waa ku hayaa dalka gaadiidku.

   Maalin dhaweyd waxaa dhacday reer ayaa waxaa u kiraystay baabuur waxay ahaa yeen toban qor oo is dhalay (10 qof) oo is dhalay, sagaal caruura iyo hooyadood sagaalkii iyo hayadoodba way jajabeen qaarna dhaawacyo ayaa gaadhay dhakhtarka ayayna yaalaan baabuurkii ayaa la qalibmay reer masaakiinana waa ay ahayeen wanan golaha iyo xukumada u soo jeedinayaa in

reerkaa la caawiyo. Reero kale oo is dhalay oo iyagana sedex ahaa ayaa jira oo ku dhintay jidhkaa dheer sidoo kale booramana waa jiraan sadex ku dhintay dhanka kale diin qalna waa jireen dad iyana ku dhinteen markaa dhibaatadanu waa mid taahan oo wax ka qabasho badan u baahan xaqiiqdiina waa arin wax ka qabasho badan u baahana.

Xeerkana waa in aan dabaqno oo aan aad u xoojino wax ka qabashada iyo dhibaatada gaadiidku dadka ku hayaba wadooyin keenuna waa wadooyin yar yar oo marka horaba jidad waaweyn maynan lahayn meel walbana daar ayaa la dhisay jidkiina waa la awdayaa oo daarta meel loo maro la garan mayo waxaana loo bahan yahay meesha booyadu u soo mari lahayd oo waayo gurigu biyo ayuu u baahan yahay dadku waa dhimanayaanoo meel maydka laga qaado ayaa loo baha yahay oo wadooyinku intaa waa la sii yaraynayaa dhibaatooyin badan ayaa dhacay sharciguna ma midaysna oo Gobolada Somaliland ma mideysna taa hada ka horna waan soo jeediayay lixdii gobo lee dalka sadexba xeer ayay lee dahay oo iyagu samayteen malaha anuu ma garanayo malaha waa xeer jajab oo dadku samaytay sadexda gobo lee bariga waxaa laga dhaqmaa darawalka iyo ninka baabuurka leh ayaa shilka look ala badhaa dabadeedna kii baabuurka lahaa badh ayuu bixiyaa ka dirawalkiina badh ayuu bixiyaa, sadexda gobo lee galbeedka iyagu waxaa weeyi darawal ka ayaa bixiya gawaadhidu kuma jirto markaa dalkii sharcigiisiiba ma mideysna waana in la mideeyaa sharciga.

Dhanka kale waxaa dhacdey mudo ilaa toban sano oo dhawdhaw(10sano) in nin bilays sarkaal ah gaadhi ku jiidho hotel maaweel agtiisa ninkii wuu naafoobay nin dhalin yarana waa uu ahaa oo afartankii sano wax uga dhiman yihiin intaa qaarka sare ayuu ka nool yahay inta kale waa ka dhintay waan la isu tuurtuuray xaqiisii waxaana isu tuurtuuray reerkii gaadhiga lahaa iyo reerkii wadaha baabuurka reer waa bixiyeen wixii ku soo hagagay reer kii lana waxay yidhaah deen waxaan nahay goboladaa bariga oo sharcigayagu waa sidaa oo shuqul kuma lihin, arintaana waxaa keenay dalkiibaan sharcigiisu mideysnayn.

**Waxaan Soo jeedinayaa:-**

Dhibaatooyin joogta ah oo doonaya in wax laga qabto ayaa jira markaa anuu waxaan soo jeedin lahaa dhawr qodob

- In ciidan wadooyinka hawshu waa ay ku badan tahay lacag ka badan la siiyo in ta la siiyo ciidamada kale waayo qofku hadii uu daba ka war war qabo wuu is dusayaa oo waayo mahaayo wax uu ciyaalkiisii ku geey iskuul caruurtii qadadiina aanay haysan waa in uu dayn qaataa ama moral jab meelahaa gidaarada istaagaa
- Iyagana waxaan u soo jeedinayaa in sharciga ku adkaadaan oo anay moral jabin ee ay sharciga dhawraan
- Sharciyada Somaliland na ha la mideeyo oo aanay lixdii gobal sadexba aaanay ku dhaqmin sharci gooniya
- Inta wadooyinka la maynayo waxaa loo bahan yahay in baabuurta la kala nidaamiyo oo ilaa mudo lix bilooda la joojiyo baabuurta soo dagaysa in ay wax kal hufmayaan

- Waxaan kale oo aan soo jeedin lahaa in hadadka la habeeyo oo labada dirawal isxigaan oo lagu soo cliyo sidii markii hora ay ahaan jirtay oo labada dirawal ay is xigaan hana la adkeeyo sharciga waayo waxad arkaysaa gaawaadhi xawli ku socota isagoo sodeon caruura sida siiba basaska oo isagoo sodon(30kursi) ku siya uu qaado afartan caruura(40caruura) aadana uu socdaa markaa waxaan soo jeedinayaa in sharci aad u adag laga soo saaro xeerkana waa uu inagu raagin halagana midhadhaliyo waayo waa xeer aad u muhiim ah.

**Gudoomiyaha:-** aad ayay u mahad san tahay xildhibaan baar waayo wax soo soo qaadey qodobo aad u mihiim ah laba qodon aya soo qaadey

- ✓ Midi waxaa weeyaan wado marista sidaad ka war qabtaan xildhibaano gadiid keena in tabadan ama boqolkiiba sagaal iyo sagaashan is teerinka waxay ku leeyiin dhan midigta ama dhinaca qaladka ayuu kaga yaalaa haadka aan marnaan dhanka midigta weeyaan markaa waxaa loo baahnaa in uu hdinaca bidixda kaga yaalo qaladka ka sii weyni waxaa weeyi baasaska badan koodu albaabka waxay ku leeyihiin dhinaca bidixda wana dhankii wadada markaa marka yay caruurtu ka soo dagayso intabadan babuur kale ayay Qatar ku yihiin in ay ku dhacaan

- ✓ Qodobka kale ee xaga ciqaabta ama khasaaraha ay gaystaan gadiidku oo qofku ku dhinto ama uu ku dhaawacmo arinkaasi waxaa uu u yalaa max kamadaha waana xee jajab lakiin xeer keenanu waxaa uu ka hadlayaa wada mariska lakiin khasaaraha ay gaystaan wadayaasha iyo dadka gadiid kaleh waxay taasi u taalaa maxkamadaha waxayna ila tahay in aan iyadana markeeda xeer gooniya ka soo saarno waad mahad san tihiin.

5. **Md. Maxamed xuseen X. Ciise:-** Gudoomiyaha, xildhibaanada sharafta leh iyo shaqalahaba dhamaan waad salaamantihiin sida aan wada arkayno run ahaantii xeerkanu waa xeer muhiim ah waana laga maar maan in uu Golahin dhaqo oo laga doodo uuna ansixiyo Goluhu runtiina xeerka markaa eegto waa xeer badan lakiin inta aan ka gaadhay ama aan ka eeg eegan xeerku manfaciisu waa uu badan yahay, waxa uun mahiima in la eego xeerku waxa uu qorayo iyo habka aan maanta is tic maalayno ayuun baa kala duwan.

Matalan waxaa uu xeerku qorayaa ama uu cadeynayaa haadka la marayo ee baabuurtu marayso anuu ***waxaan soo jeedin*** lahaa ama waa in baabuurta la badalaa isteerin kooda ama waa in haadka la badalaa sida ay xildhibaan Baar ka dhawaajisay oo waa in xeerkanu marka uu dhaqan galo ay qasab noqotaa in la badalo taasaa la rabaa in uu xeerku xooga saaro.

Waxa yaabahan kale ee xawaaraha iyo sharciyadu way jiraan oo hadh iyo habeen waa loo shegaa dirawaliinta ee iyaga ayuun baa ka idho adeyga sida gaawaadhida Jaadka, Basaska caruurta qaada dhamaantood iyaga ayuun baa qardo jeexa ee sharciyan xawaaraha waa loo sheegaa ee waa lagu cadaynayaa ee waxay rabaan in gacanta lagu qabto ayay doonayaan.

Hadaba hadaan xeerka yara eego xeerkani wuu fican yahay guud ahaan lakiin waxaad moodaa in la turjumay oo turjumaad la gu sameeyay markaa marka aad akhrido xeerka meelaha qaar ayaa biyo dhaciisa aad moodaan in ay wax ka si noqonayaan.

Markaa **Qayta 1[aad]** ee Eeray bixinta Matalan halka ay ku qorantahay *laamay waxay noqonaysaa in wax lagu daro oo loola jeedo wada kasta oo caadi ahaan laagu talo galay isu socodka gaadiidka* markaa wado dhisan miyaa? Markaa waa in ay ka muuqataa oo malamay dhisan oo gaadiidka iyo dadkuba maraan meesha kale ee aan fahmi waayay waxaa ka mid *laf ama buur:- waxaa loola jeedee waddo dheer taas oo aragtidu ay soo koobmayso iyada oo ay is badalayaan heerka tiirad*, markaa ma wado tiirs ah baa ma wado buur ah baa markaa marna waxaa uu ka hadlayaa buur marna tiiro waxaan o dhan lahaa halkaa hala saxo oo ay gudigu saxaan ayaan soo jeedin lahaa

***Qodobka 4[aad]*** ee Shuruudaha iyo Mamnuucida iyo xadidaada la xidhiidha isu socodka waddooyinka Qaranka ***farqadiisa 1[aad]*** xarafkiisa (A) Gudoomiyaha Gobolku waxaa uu si ku meel gaadh ahaan u hakin karaa isticmaalka wadooyinka dawlada ama dhabooyinka dhamaan kuwa adeegsada ama qayb ka mid ahn ku waasi, waxaa u ku soo rogayaa fasax gaar ahaaneed adeegsiga gaadiid gaara. Maraa waxaan odhan lahaa halka uu ka isticmaalay kalmad dhamaan waxaan is idhi wax baa ka maqan oo sima qabanayso, waxaa kale oo ay u baahan tahay akhris iyo dib u habayn. Dhanka ganaaxyada waxaad moodaa in ay aad u kooban yihiin oo 10,000kun, 5000kun, 50,000kun way fududahay oo markii hore aad ayay u badnayd ee somalliland shilinka la bilaabay markaa waxaa haboon in si macquula laga dhigo, iyo meelaha kale ee u baahan in la hagaajiyo sida taarikada oo kale xeerka sida ku qoran iyo sida aan is ticmaalaa waa laba aan is lahayn, waayo sida uu sheegayo xeerku wuu gobolayna yaa oo waxaa uu leeyahay waa in ay ku cadaataa meesha laga qaatay Hargeisa, Barbara, Burco inana maanta waxaan u wadnaa si taxane ah oo waxay ku socotaa 100,000 kun.

**Soo jeedin:-**

- Waxaan ku dari lahaa in uu xeerku taarikada xadido oo marka ay gaadhaan kun laga dhigo tiro la raaciyo 100A oo kale oo la qayb qaybiyo loona kala saaro Xamuul ,Bas , kii dawlada, kii shicibka iyo ku kalaba.
- Waxaam kaloon soo jeedin lahaa shilal ka waxaa uu xeerku soo saarayaa ganaax markaa waxaa loola noqonayaa Maxkamada iyo meelaha ya khusayso sida shareecada oo xeerka lagu qoro ayaa haboon.
- Waxaa aniga aad iigu mihiim ah in labarkaa la clear greeyo oo uu noqdo mid waa dax ah oo qofka taraafikadii markuu arko uu markaaba si fudud ku garan karo.

6. **Md Cabdi Maxamud Gaagaale: -** aad iyo aad ayaan ugu mahad naqayaa gudida soo diyaarisay sharcigan waana sharci aad u wanaag san oo ay ku dhadhmi doonaan caruuraheenu ee maa mid hada uun lagu dhaqmayo aadna waa uga soo shaqeeyeen ragaasi.

Anuu waxaan is kor taagayaa sadex qodob oo muhiim ah.

1. Liisanka, inta badan waxaa culaysku ku dhacaa waa nimanka dirawaliinta ah waayo marka la bixinaayo liisanka imtixaan wanaag san lagama qaado barigii hore imtixaan fiican baa laga qaadi jiray oo barigii hore buuro ayaa la saari jiray oo haduu in yar ka soo noqdo waad wayday aya la odhan jiray lakiin hada lacag yar ayaa la bixiyaa sidaa ayaana lagu qaataa waxaa acidenka badinayaa waa ta.
2. Ciidanka gaadiidka ee taraafikada ah waxay iyana u baahan yihiim tababar waayom ninka waa la qorayaa waxaa uu odhanayaa halkaa ayay woxogaa dhaqaale ahi ku jiraaye hala I geeyo oo dariiqa is taagayaa oo shaxaad u dhaqaaqayaa baabuurtana is wada daba joogsanaysaa markaa waa indibada loo diro oo wax la soo baraa.
3. (Accident)ku had iy jeeraale waxa uu ka dhaca waa sun xidhasho la'aanta, waayo dhamaan wey wada leeyihiin suuman ee waxaan leeyahay halagu khasbo dadka baabuurta wada.
4. Waxaa kale oo aan ku darayaa liisanka gaadhiga waan laga dhigaa sida caalamka oo 5 tiisanaba mar la jidiidiyaa oo laga daayaa 1ka sano. Waxaa kale oo aan odhan lahaa Basaska iyo baabuurta oo dhan suuro galmaahan in isteerinka la badalaa ee waxaa ila haboon in la badalo wadada ayaa ila haboon waana labada laa basaska dariiqa dadka ku dajinaya sida ugu dhakhsaha badan waad mahad san tihiin.

7. **Md. Ibraahim Maxamed Dhaadheere:-** shirgudoonka iyo xil dhibaanada dhamaan waad salaaman tihiin. Dhaawaca iyo dhimashada badatay ayaa sobotay in sharcigan la badiyo hadaba s ill yareeyo waa in baabuurka lagu jeegareeyaa dakada uu ka soo dagayo in uu yahay baabuur hagaag san oo soconaya yahay. Dhanka Basas ka waa in tiro xadidan qaadaan, haadadka ay dhibaatadu ka taagan tahay laba way inoo furan tahay in aan wada balaadhino sidii xidhibaan Cabdi sheegay ama waa in aan badalaa baabuurta soo dagaysa oo laga badalaa isteerinka dhinaca uu kaga yaalo. Waxaa kale oo aan adkaynayaa (security bille ka ).

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------------- | ---------------------------------------------- |